



Taageero iyo ilo ay heli karaan ardayda wax ka qabata isticmaalka maandooriyaha

Dugsiyadda Dad weynaha ee Portland waxay siisaa adeegyo iyo fursado kaladuwani ardayda iyo qoysaskooda si loo kordhiyo fahamkooda isticmaalka maandooriyaha dhalinyarada iyo go'aan qaadasho caafimaadka leh.

Waxaan ku faraxsanahay inaan awood u siineyno tababar degmo balaaran oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaskooda dhamaadka Febraayo kaasoo diiradda saari doona kahortagga isticmaalka maandooriyaha. Faahfaahin dheeraad ah iyo maclummaad ayaa la heli doonaa toddobaadyada soo socda.

Haddii aad u baahan tahay taageero ama gargaar, agabyadan ayaa diyaar ah:

Taageerada kambaasyada dugsiga sare: Waqtigaan la joogo, waxaa jira la-taliyeeyaa, shaqaale bulsho iyo shaqaale kale oo taageera dugsiyada sare. In kasta oo la-taliyayaasha iyo shaqaalaha bulshada aysan awoodin inay bixiyaan la-talin maandooriye, waxay noqon karaan meel wanaagsan oo lagu bilaabi karo marka la eego aqoonsashada ilaha iyo helitaanka fikradaha ku saabsan heerka ku habboon ee taageerada canuggaaga. Fadlan wac xafiiska ugu weyn ee iskuulkaaga si aad u ogaato magaca lataliyaha ilmahaaga ama aad u ogaato in iskuulkaaga leeyahay shaqaale bulsheed dugsi.

La taliyayaasha isticmaalka maandooriyaha ee shatiyesan: Iyada oo loo marayo iskaashi lala yeesho barnaamijyada daaweynta da 'yarta, qaar ka mid ah dugsiyada sare waxay leeyihiin la-taliyayaal isticmaalka maandooriye shati leh oo ku yaal kambaaska hal ama laba maalmood usbuucii. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan marin u helka agabkan iyo haddii ay jiraan xannibaado caymis, fadlan la xiriir la-taliyaha ardaygaaga ama shaqaalaha bulshada dugsiga.

Fasalada wacyigalinta: Fasalka wacyigalinta waa barnaamij waxbarasho loogu talagalay ardayda fasalada 6-12 iyo qoysaskooda kuwaas oo raadinaya maclummaad kusaabsan saameynta aalkolada iyo daroogooyinka kaleba ku yeeshaan dhalinyarada. Tan waxaa ku jira ardayda ku xadgudbay nidaamka isticmaalka maandooriyaha ee Portland. Wixii maclummaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan foomamka gudbinta, ka eeg [boggan](#).

Qalabka Onlynka ah: PPS waxay kaloo hayaan [Qalabka Onlynka](#) kaas oo leh agabyada, maclummaad iyo liis dhacdooyinka soo socda. Abuuritaanka qalabka waxaa lagu maalgeliyey deeq deeqsinimo leh oo ka timid Regence si loo ballaariyo adeegyadeena kahortaga maandooriyaha.

Wixii su'aalo dheeri ah ee ku saabsan adeegyada iyo Barnaamijka REAHL Initiative, fadlan la xiriir [Mary Krogh](#).

Mary Krogh, Isuduwaha PPS ee Taageerooyinka Daroogada & Khamriga